



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kal.5-aad**

**Dokumeentigal.5-aad kul.Gaarkaah 1-aad**

**20/09/2014**

**Kal.5-aad**

**kul.Gaarka ah ee 1-aad ,saac. Fur.12:20gh,saac.Xir.01:00gd.**

**Qourum 149Xil**

**Ajendaha:**

- 1. 09:00 -10:00 Imaatinka Xildhibaanada**
- 2. 10:00 -10:45 Imaatinka Golaha Wasiiradda**
- 3. 11:00 -11:15 Imaatinka Ku Simaha R/Wasaaraha iyo Guddoomiyaha Maxka madda Sare**
- 4. 11:20 -11:30 Salaan Sharfta Madaxweynaha JFS**
- 5. 11:45 Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 6. 11:50 Hadal jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
- 7. 12:00 Khudbadda Madax -weynaha JFS**

**Shir-Guddoomye,**

**Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,**

**Waxaashirkafurey Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari**

**Guddoomiyaha** wuxuu Xildhibaanada ka codsaday in Ajendaha la Ansax iyo Xildhibaanada wey ansaxiyeen. Wuxuu intaa ku darey in Guddoomiye K/Xigeynka 2-aad Mudane Mahad Cabadalla Cawad uu soo dhaweynaayo Madax-weynaha JFS. Mudane Xasan Sheekh Maxamuud.

Kadib, Guddoomiyaha wuxuu u yeerey Xildhibaan Sheekh Shaacir si uu u akhriyo Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.

Guddoomiyaha wuxuu u mahad celiyey Madax-weynaha JFS. Mudane Xasan Sheekh Maxamud, Ku-simaha R/Wasaarahaahna R/Wasaare K/Xigeyn Mudane Ridwaan Xirsi Maxamed iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare mudane C/llaahi Ceydiid Ilka Xanafay si habsami leh u wadashaqeyn doonan.

Wuxuu ka loo Guddoomiyaha sheegay in Kalfadhiga 5-aad uu Baarlamanka ku shaqeyndono

Qaabkaan soo socda :-

- In Guddiga Baarlamanka uu shaqeyn doono 3-(Seddex) Maalmood .
- In 3-(Seddex) Maalmood ay shaqeyn doonaan Baarlamanka oo dhan ,soonna doona shirarka Baarlamanka.

Wuxuu kaloo intaa raaciyey in marnaba aysan ka indha-qarsandoonin Xasanadda Xildhibaanada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Guddiga Joogtada ah waxaygo'aan ku gaareyn in Guddiyadda wixii howl ah ee loo gudbiyo in ay heyn Karin howshaas muddo kabadan 10 casho.

Kadib , wuxuu ku soo dhaweeyey Madax-weynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ,si uu Golaha Baarlamanka ugu soo jeediyo Qodbadiisa.

Madax-weynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu sheegay iney farxadweyn ay u tahay manta in uu furo kalfadhigii 5-aad ee Golaha Shacabka Soomaaliyeed.

Wuxuu tacsii u diray Dhammaan Golaha Shacabka, Ummadda Soomaaliyeed iyo qoysaskii

Iyo ehaladii Xildhibaanadii Geeriyooday, Ciidamada nabad galyada Howl wadeenada Dowladda iyo kuwa kale ee gacanta Caddowga ku dhintay, in Samir iyo iimmaan Illaah ka siiyoEheladooda ay ka geeriyooday.

Madaxweynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu kaloo sheegay inuu kalfadhigaan furmaayo isagoo labo sano jirsaday kuna tallaabsadey Golaha Baarlamanka horumar weyn ,iyadoo lagu jiro Nabadgelyo daro „Dhaqaala xumo ,khibrad yaraan siyaasadeed iyo curdinnimo Dimoqaraadiyadeed. Kalfadhigaana wuxuu furmayaa iyadoo Dowladda ku talaabsatey Guulo la taaban karo oo dhinacyo kala duwanah. Sida :-

- 1) Dib-u-xureynta Deegaanadda
- 2) Maamul dhisida Goboladda
- 3) Dhismaha Hay'adaha Dowladda
- 4) Xiriirka Deriska iyo Beesha Caalamaka
- 5) Hiigsiga 2016ka

Wuxuuna soo jeediyay fariinta hoos ku qoran

1. Golaha Shacabka in ay yihiin xudunta Dowlad nimada waajibaadkooda qaran ee ugu horeeya ay tahay in ay dalka ka saaraan marxaladaan xasaasiga ah oo ay xaqiijiyaan himilooyinka Dalka, waxaana mudnaan leh in la ansixiyo Sharciyada, dhismaha Guddiyadda Madaxa-banaan, ansixinta Miisaaniyada taabagalinta hay'adaha Dowladda wuxuuna sheegay inuu rajeynaayo waqtigooda qiimaha badan ay ku bixinin waxyaabomudnaan u leheynta, taariiqdana aysan ku xasuusan doonin.
2. Xukuumadda wuxuu ku lardardarmay in ay wadashaqeyn joogto ah la yeelato Golaha Shacabka islamarkaasna u hogaasanto Dastuurka ku-meel-gaarka iyo Shuruucda Dalka.
3. Shacabka soomaaliyeed wuxuu u qiray iney yihiin shacab adkeysii badan waxaana laga soo gudbay marxaladihii adkaa, dibna loo noqonmaayo, wuxuuna codsaday in halmeel looga soo wada jeesto kuwa kala dhantaalaaya nabadda, wiiqaya wadajirka Dalka iyo Dadka, kuna riyoonaayo in lagu sii jiro sannadihii mugdiga ahaa. Maantana iyaga ay codka leeyihiin, labo sano gudahoodna ay dunida u muujindoonaa in ay yihiin shacabka duwankii ku sifeysnaa qaxootinimada, Burcadnimada iyo Baryootanka.
4. Beesha caalamka wuxuu ugu baaqay in ay sii wado is garabtaaga Soomaaliya, maantana Soomaaliya waxaa u harsan wax yar, abaalkana loogalayna ma iloobidoono, Soomaaliya waxay noqondoonta xubin beesha caalamka ay ku tashato garabna u noqoto nabadda iyohorumarka.

Madax-weynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Muxamud, wuxuu qudbadiisa ku soo gabagabeeyay in kalfadhiga 5-aad uu furan yahay.

**Kalfadhiga 5-aad kulankiisa Gaarka ah ee 1-aad uu shir-Gudoomiinaayay Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Muxamad Sheekh Cusmaan (Jawaari)uu xiranyahay saacadda markey aheyd 01:pm.**